



Wadahadal warbixin khasaba

Warbixin kooban oo ku socota adiga waalidka ka hor sharciga ku saabsan wadahadal warbixin khasabka ee khilaafyada ku saabsan daryeel, deegaan iyo la kulan



MYNDIGHETEN FÖR
FAMILJERÄTT OCH
FÖRÄLDRASKAPSSTÖD

Wadahadal caruurta awgeed

Kala tag sidaas uma sahlana, gaar ahaan markay sawirka ku jiraan caruu.

Si loo xoojiyo aragtida xaqquqda caruurta ee habraaca daryeel waxa ay dawladdu go'aamisay laga bilaabo 1 janaayo 2022 inay hirgeliso sharciga ku saabsan wadahadal warbixin. Taas macnaheedu waxay tahay inay waalidku ay miisaamaan inay khilaafkooda la aadaan maaxkamadda ay marka hore helaan warbixin ku saabsan kaalmada iyo taageerada jirta ee laga heli karo ee ka baxsan maxkamadda.

Sharcigan waxa uu usoo baxay in diirada lagu saaro waxa u wanaagsan caruurta, iyo rajada ah in wadahadalka warbixinta ay inta badan ay waalidka ka saacidi karto inay ka baaqsadaan inay usii gudbaan maxkamad.

Bogaga soo socda waxa aad si dheeraad ah uga sii aqrisan kartaa wadahadalka warbixinta. Waxa ay qaadanaysaa ugu badnaan shan daqiido iyo waxa ay kor u qaadaysaa fursadda ah inaad heshaan wadada ugu sahlan ee horay loogu socon karo.



Mararka qaar wadahadalka daryeel,
deegaan iyo la kulan waxa uu keenaa
khilaf iyo isku xiran sababa in caruurtu
ay dhexda kusoo dhacaan-iyada oo ay
taasi tahay midda udanbaysa ee uu
waalid rabo....



Wadahadal warbixin oo kooban

Muxuu inooga dhigan
yahay sharciga cusubi inaga
waalidka? >

Wadahadal warbixin waa in lagu abtaa sida ugu dhaqsiyaha badan o suurta galka ah iyo ugu danbayn afar asbuuc gudaheed laga bilaabo markii aad codsateen wadahadalka.

Marka hore waxa laydiin soo bandhigayaa wadahadal wadajir ah, wadahadal gooni ah waxa uu jiri karaa hadii ay jiraan sababa khaas ah (tusaale tuhun ah inay haceen dhibaatayn iyo ku xadgudub). Waxa kale oo mar walba laydiin soo bandhigayaa wadahadal gaara hadii aad idinku sidaas codsanaysaan.

Muxuu yahay hiigsiga
wadahadalka warbixinta? >

Sharciga ku saabsan wadahadalka warbixinta waxa la hirgeliyay 1 janaayo 2022, laakiin laga bilaabo 1 maars 2022 waa shuruud laga rabo waalidka raba inuu khilaafka ka furo maxkamadda inuu marka hore ka qayb galoo wadahadal warbixin.

Degmada ayaa ka mas'uula ah wadahadalka oo kharash la'aan u ah waalaikda.

< Ma jiraan khatar in tani ay sii
dheerayso khilaafkayna?

Ujeedada wadahadulku waa in adinka waalidka ah laydinku wargeliyo fursadaha xal wadar ogol ah ee ku aadan su'aala ku saabsan daryeel, deegaan iyo la kulan. Rajadu waxa ay tahay in laga leexo in khilaafku uu gaaro maxkamad.

In waalidku heshiiyo waxa ay mar walba caruurta u tahay xaalad degen iyo mid amaan. Xal wadar ogol ah waa mid mar walba jiraysa maadaama ay waalidku isku si u arkaan sida uu u shaqaynayo daryeel, deegaan iyo la kulanka.

Su'aalahaa aad jawaabtooda helayso inta lagu jiro wadahadalka warbixinta:

- ~~~ Kaalmadee ayaan heli karaynaa si aan u gaarno xal wadar ogol ah iyo weliba inaan iska ilaalino habraac maxkamadeed?
- ~~~ Hadii aan heshiino, sidee ayaan dokumenti uga dhigi karnaa si aan isfahamwaa u imaan mustaqbalka?
- ~~~ Maxaa dhacaya hadii aynaan heshiin?
- ~~~ Maxaan samayn karayaa hadii uu xiriirku ka dhex dhacaan hanjabaad iyo xadgudub?
- ~~~ Waa maxay wadahadal wadashaqayn iyo waa maxay fariga udhaxeeya wadahadalkas iyo talasiinta reerka?
- ~~~ Sidee ayuu khilaaf waalid iyo habraac maxkamadeed usaamaynayaa caruurta?
- ~~~ Maxay habraac maxkamadeed xalin kartaa?
- ~~~ Hadii aan rabno inaan maxkamadda aadno, sidee u samaynaynaa markaa?
- ~~~ Muddo intee la'eg ayay qaadanaysaa habraac maxkamadeed?
- ~~~ Kuma ayaa iga saa'cidaya garnaqsiga maxkamadda?
- ~~~ Ma jirtaa fursad dhaqaale oo loo helayo kharashaadka maxkamadaynta?
- ~~~ Waa maxay go'aan ku meelgaar ah?
- ~~~ Baaritaanada nooyadee ayaa jiri karaya?
- ~~~ Hadii aanan ku qanacsanayn go'aanka maxkamadda, fursadahee jira in racfaan laga qaato ah?





MYNDIGHETEN FÖR
FAMILJERÄTT OCH
FÖRÄLDRASKAPSSTÖD

Warbixino dheeraada:
www.mfof.se/informationssamtal

